

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha ee Boston,

Waa mudnaanta ugu saraysa ee Dugsiyada Dadweynaha ee Boston (BPS) in la ilaaliyo ardaydeena iyo shaqaalaheena inay amaan iyo caafimaad ku yeeshaan dugsiyadeena. Sidaad ogtahay, wararka ku saabsan coronavirus-ku waxay sii wadaan inay sii weynaadaan nasiib-daro fayrasku wuu sii fidaa. Si kastaba ha noqotee, halista ka imaanaysa Boston weli way hooseysaa. In kasta oo ay jirto khatarta hoose ee Boston, waxaan isu diyaarinaynaa wixii horumar ah. BPS waxay isha ku hayaan xaalada si dhaw waxayna xiriir joogto ah la leeyihiin la-hawlgalayaashayada magaalada ee Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston (BPHC).

Is-xusuusin ahaan ka timid labadii waraaq hore ee xanuunnada jiilaalka ee loo diray qoysaska iyo shaqaalaha, Halkan waxaa ku yaal talo bixinno ku saabsan sidii aad caafimaad qab u heli lahayd oo aad naftaada uga ilaalin lahayd hergebka iyo cudurada neefsashada:

- Badanaa gacmahaaga ku dhaq saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 sekan
- Hadaadan heli karin saabuun iyo biyo, isticmaal gacmo nadiifiye alkolo ku saleysan
- Ka fogeey taabashada indhahaaga, sankaaaga, ama afkaaga gacmo aadan dhaqin
- Ka fogow xiriir dhow inaad la yeelato dadka jiran

Haddii aad leedahay astaamo u eg-qabow, waxaad ku caawin kartaa inaad dadka kale ka ilaaliso:

- Guriga joog inta aad jiran tahay
- Ka fogow xiriir dhow inaad la yeelato dadka kale
- Ku dabool afkaaga iyo sankaaaga tiish (ama gacan) markaad qufacdo ama hindhisto, marka ku tuur tiishka qashinka oona gacmahaaga dhaq
- Nadiifinta iyo waxyaabaha jeermiska lagu dilo iyo sagxadaha

Intii lagu jiray fasaxii Febraayo, Shaqaalaha ilaaliyaha BPS waxay sameeyeen nadiifin qoto dheer dhamaan dhismayaasha dugsiya. Kalkaaliyayaasha dugsiya iyo Adeegyada Caafimaadka BPS waxay sii wadaan la shaqeynta BPHC si loo go'aamiyo haddii wax nadiifin ah oo la bartilmaameedsado looga baahan yahay iskuulada ay la kulumayaan tiro badan oo arday ah oo qaba cuduro jiilaalka., sida hargab-daran ama hargabka caadiga ah.

Si aad u hesho warbixinta ugu ugu dambaysa uguna kalsoonida badan ee coronavirus-ka, fadlan booqo websaydhka BPHC ee [www.bphc.org](http://www.bphc.org). Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimaad, waxaad kala xiriiri kartaa Adeegyada Caafimaadka BPS ee 617-635-6788. Wixii talooyin dheeri ah iyo agab, fadlan booqo websaydhka Waaxda Adeegyada Caafimaadka BPS ee [bostonpublicschools.org/healthservices](http://bostonpublicschools.org/healthservices).

Waxaan sii wadi doonnaa inaan kula socodsiianno sida hagida BPHC iyo talo la soo saaray.

Mahadsanid,



Dr. Brenda Cassellius  
Kormeeraha guud